Nabigu scw ma uu aqoon sida loo kala jaro suuradaha ilaa ay ku soo dagtay aayada bisinku {بسم الله الرحمن الرحيم }

Ibnu Cabbas Allaha ka raali ahaado isaga iyo aabihiye waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu scw ma uu aqoon sida loo kala jaro suuradaha ilaa ay ku soo dagtay aayada bisinku {بسم الله الرحمن الرحيم }.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

ibnu Cabbaas wuxuu cadeeyey in Qur'aanku ku soo dagaayey Rasuulka naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate isaguna aanu aqoon sida loo kala jaro iyo dhamaadka suurada, ilaa uu ku soo dagay bisinku oo uu ogaado in suuradii hore dhamaatay, oo ay suurad cusub bilaabatay.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65051